# Ogolaanshaha Adeegyada Daaweynta
# Consent for Treatment Services

**Magaca Dadka:** **Taariikhda Dhalasho:**

Qaybta Adeegyada Caafimaadka iyo Isticmaalka Mukhaadaraadka (BHD) ee Degaanka Multnomah waxay bixisaa adeegyada caafimaadka dhimirka, oo ay ka mid noqon karaan: qiimeynta; go'aanka qiimeynta heerka baahidu gaarsiisan tahay 'level of need determination screening'; la socodka; talo-bixinta; waxka qabashada degaanka; daaweynta qofka, koox, iyo qoyska ama isku duwidda daryeelka; maamulka kiiska; kulannada kooxaha carruurta iyo qoyska; adeegyada dhibaatooyinka; iyo/ama macluumaadka iyo u gudbinta ee adeegyada caafimaadka dhimirka ama baaritaanka iyo gudbinta kaliya. Adeegyada waxaa lagu bixin karaa si shakhsi ahaan ah, telefoonka, ama iyada oo la adeegsanayo daaweynta dhanka internet-ka 'telemedicine'.

HALISAHA IYO FAA'IIDOOYINKA AY LEEDAHAY

**Ujeedada laga leeyahay daaweynta caafimaadka dhimirku waa in la yareeyo astaamaha caafimaadka dhimirka ee gaarka ah. Waxaa jira khataro ay leedahay daaweyntu:**
Astaamuhu way ka sii dari karaan ka hor intaanay ka soo raynin ama waxaa suuragal ah in ay sii jiraan xataa marka daaweynta dhamaato. Astaamo cusub ama arrimo la xiriira daaweynta ayaa laga yaabaa in ay soo baxaan inta lagu jiro daaweynta. Horumar la xiriira astaamaha caafimaadka dhimirka ama arrimaha kale wuxuu keeni karaa isbeddel ay suuragal tahay in uu carqaladeeyo habka nolosha ama xiriirada ka dhexeeya dadka. Daawada xanuunka maskaxda, haddii la isku qoro, waxay yeelan kartaa raadad ay suuragal tahay in loo baahdo la socod ama maarayn.

**Waxaa sidoo kale jira faa'iidooyin ay leedahay daaweyntu:**
Dadka ka qayb qaadanaya daaweynta caafimaadka dhimirka inta badan waxay bartaan xirfaddo ka taageera sidii ay ula tacaali lahaayeen dareenada xoogan ee ay qabaan, isbeddelka la xiriira fikirka burburka keenaya, kordhinta xiriirka ka dhexeeya dadka iyo saameynta wanaagsan ee guud ahaan hab-dhaqanka iyo wanaaga qofka.

AQBALAADDA MACMIILKA IYO HESHIISKA

**Waxaan caddaynayaa in aan helay macluumaadka soo socda oo qoraal ah oo sidoo kalena la ii sharaxay:**
Haddii aanan lagu siin fursad aad dib ugu eegto dokumentiyadani ama u baahan tahay iyaga oo ku qoran luqad kale, fadlan la xiriir dhakhtarkaaga ama shaqaalahaaga Waaxda Caafimaadka Hab-dhaqanka.

- Sharaxaad ku saabsan xuquuqdayda qof ahaaneed, iyo/ama ilmahayga anagoo ah macmiilka Degaanka Multomah BHD.
- Ogaysiinta Dhacdooyinka Asturan (Notice of Privacy Practices - NOPP). NOPP waxay sharaxdaa hawlaha la xiriira waxyaalaha gaarka ah iyo sir ahaanshaha ee Waaxda Caafimaadka Degaanka Multnomah iyo ka BHD.
- Warqadda iyo Foomka Cabashada (Tabashada) BHD. Waxaan sidoo kale fahamsanahay haddii aanan ku faraxsanayn adeegyada, ay suuragal tahay in aan bilaabo cabasho/tabasho dhanka afka ah ama qoraal ah oo aan u gudbiyo qof shaqaale ah ama sii maro adeegyadayga, ay suuragal tahay in aan bilaabo cabasho/tabasho dhanka afka ah ama qoraal ah oo aan u gudbiyo qof shaqaale ah ama sii maro wakiilkayga.
- **Macaamiisha da'doodu tahay 18 jir ama ka weyn tahay oo kaliya:** Waxaa la i siiyay macluumaad ku saabsan sida loo buuxiyo Ku dhawaaqidda Daaweynta Caafimaadka Dhimirka.

# Ogolaanshaha Adeegyada Daaweynta
# Consent for Treatment Services

- **Macaamiisha da'doodu tahay 17 jir ama ka weyn tahay oo kaliya:** Waxaa la i siiyay macluumaad ku saabsan isku diiwaan gelinta cod bixinta.
- **Waalidiinta ama mas'uuliyiinta sharciga ah:** Waxaa la igu wargeliyay oo ku raacsanahay in ay shaqaalaha Degaanka Multnomah ee BHD ay dhici karto in ay isku qofka si toos iskula dubaridaan shakhsi ahaan; iyada oo la adeegsanayo telefoonka, email-ka, ama fiidiyow.

**Macluumaadka Bixinta Caymiska**
Sharciga federaalka ayaa u baahan haddii adiga ama adeegyada caafimaadka dhimirka ee ilmahaaga uu bixinayo Qorshaha Caafimaadka Oregon, la samayn doono dadaalo macquul ah oo lagu xaqiijinayo in Qaybta Barnaamijyada Gargaarka Caafimaadka ee Oregon (Division of Medical Assistance Programs - DMAP) ay noqoto bixiyaha u dambeeya marka wax kale la waayo. Haddii adiga ama ilmahaaga uu caymiskooda bixiyo caymis ganacsi ama meelo kale lacag laga helo, waxaa suuragal ah in lagaa codsado in aad saxiixdo ogolaansho si loo diro lacagta biilka ee adeegyadan. Awooda aad u leedahay in aad bixiso lacagtu kaama horjoogsanayso helidda adeegyada.

**Qiyaasta Lacagta La isku soo Dalacayo**
Qiyaastani Daacada Laga yahay 'Good Faith Estimate' waa mid shaqeynaysa ilaa adeegyada laga joojinayo. Iyada oo aan loo eegayn xaalada caymiskaaga, nooca, ama daboolista caymiska, waa siyaasadda Waaxda Caafimaadka Hab-dhaqanka ee Degaanka Multomah in aysan marnaba kuu soo dirin biilka adeegyada.

Ogaanshaha Xanuunka Koowaad/Labaad: Aan la ogayn marka la joogo waqtiga qorsheynta. Ogaanshaha xanuunka waa la go'aamin doonaa.

Adeegyada: T1023, H2011, 99212, 90791, 90792, 90832, 90846, 90847, 90849, 90853, 90882, H0004, H0032, H0038, H2010, H2014, H2023, H2032, T1016

Waxaad bixinaysaa: $0.00

Waxaan oggolaanayaa in adeegyada sida loo qeexay loo bixiyo. Waxaan iniga oo raali ka ah iyo si ikhtiyaari ahba u bixinayaa ogolaanshahayga la xiriira adeegyada laga bilaabo taariikhdan ilaa laga gaarayo dhammaadka daaweynta. Waxaan fahamsanahay in aan wakhti kasta joojin karo ogolaanshahani anigoo qoraal ahaan ama dhanka afka ugu gudbinaya shaqaale ka tirsan BHD. Waan akhriyay oo fahamsanahay Qiyaasta Lacagta La isku soo Dalacayo ee kor ku qoran.

| | |
|---|---|
| Saxiixa Elektaroonig ah ee Macmiilka/Mas'uulka | Taariikhda iyo Wakhtiga Saxiixa Elektaroonig ah |
| Cinwaanka Email-ka ee Macmiilka/Mas'uulka | Lambarka Telefoonka Macmiilka/Mas'uulka |
| Cinwaanka Email-ka ee Xubinta Shaqaalaha BHD | Taariikhda Uu Gudbiyay Xubinta Shaqaalaha BHD |